

: somalisk
Informasjon til enslige mindreårige asylsøkere

NOAS

WARBIXIN LOOGU TALA GALAY MAGANGALYO DOONKA AAN QAANGAARKA AHAYN EE AAN LALA SOCON

LOOGU TALA GALAY DADKA U DHEXEEYA 15 JIR IYO 18 JIR

Miyaad 18 jir ka yar tahay? Miyaad dalka Norway u timid si aad u weydiisato magangalyo, taasoo ah badbaadin, adigoo aanay kula socon waalidkaagu ama dad kale oo ku daryeela? Haddii ay sidaas tahay, waxaad markaa tahay waxa aannu u naqaanno magangalyo doon aan qaangaar ahayn oo aan lala socon.

Buuggan warbixineed waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan waxa dhacaya marka aad dalka Norway magangalyo weydiisato iyo xuquuqda iyo waajibaadka kuu yaalla adiga oo ah magangalyo doon aan qaangaar ahayn oo aan lala socon.

WIXII KU SAABSAN QOYSKIINNA JOOGA DALKAAGA HOOYO:

Haddii hay'adda UDI aanay garanayn halka ay joogaan qoykiinnu, iyaga ayaa raadin kara. Waxaa muhiim ah in aad uga warranto qoyskiinna.

Waxaa muhiim ah in aad hay'adda UDI uga warranto qoyskiinna iyo halka ay iyagu joogaan.

Hay'adda UDI ayaa qoyskiinna raadin karta.

1. YAA MAGANGALYO XAQ U LEH?

- Waxaad magangalyo xaq u leedahay haddii aad khatar ugu jirto in lagu dilo, in lagu jirdilo ama laguu geysto xadgudub daran oo kale haddii aad ku noqoto dalkaaga hooyo.
- Haddii masuuliyiinta dalkaaga hooyo ay ku badbaadin karaan, ama haddii uu dalkaaga hooyo leeyahay meelo nabad ah oo aad joogi karto, caadi ahaan xaq uma yeelan doontid in aad magangalyo ka hesho dalka Norway.
- Shuruudaha u yaalla si dalka Norway ay badbaadin uga helaan magangalyo doonka aan qaangaar ahayn ee aan lala socon waxay badi xoogaa ka fudud yihiin kuwa khuseeya dadka waaweyn.
- Su'aasha ah cidda badbaadin xaq u leh waxaa lagaga jawaabaa heshiisyo caalami ah oo dalka Norway waajib ku ah in uu ku dhaqmo.

2. YAA LA SIIN KARAA OGGOLAASHO JOOGITAAN OO KU SALAYSAN ARRIMO BANI'AADMINIMO?

- Haddii aadan badbaadin xaq u lahayn, masuuliyiintu waxay qiimaynayaan in aad buuxinayso shuruudaha oggolaasho joogitaan sababo bani'aadmino oo xoog badan dartood ama xiriir gaar ah oo aad ku leedahay dalka Norway dartiis.

3. YAA LA SIIYAA OGGOLAASHO XADDIDAN?

- Haddii sababta keliya ee laguugu oggolaanayo in aad dalka Norway joogto ay tahay hay'adda UDI oo aanan ogayn in aad heli doonto daryeel kugu habboon haddii aad ku noqoto dalkaaga hooyo, waxaa lagu siin karaa oggolaasho xaddidan. Waxay taasi ku khusaysaa haddii aad 16 jir ka weyn tahay marka hay'adda UDI ay ka baaraandegayso codsigaaga.
- Oggolaashadani waxay soconaysaa oo keliya ilaa iyo intaad 18 sano ka gaarayso.
- Oggolaashada laguuma cusboonaysiin karo, kumana siinayso xaq qoyskaaga laguugu keeno dalka Norway.

4. DALKEE AYAA KA BAARAANDEGAYA CODSIGAAGA MAGANGELYADA?

- Dhammaan dadka badbaadin ka codsada dalka Norway looma wada oggolaado in codsigooda looga baaraandego dalka Norway. Xeerka Dublin waa heshiis wadashaqayn oo ka dhexeeya waddannada Yurub kaasoo keenaya in codsigaaga uu ka baaraandegi doono uun mid ka mid ah dalalka heshiiska qaybta ka ah.
- Haddii aad magangalyo ka codsatay dal kale oo Yurub ku yaalla ka hor intii aadan imanin dalka Norway, ama haddii ay dalkaas joogaan waalidkaaga ama dad kale oo masuuliyadda waalidnimo kuu haya, masuuliyiinta dalka Norway waxay kuu diri karaan dalkaas si codsigaaga halkaas loogaga baaraandego.
- Masuuliyiinta dalka Norway waxay ku soo ogaan karaan haddii aad dal kale magangalyo ka codsatay siyaabaha ay ka mid tahay in faro lagaa qaado.

- Haddii masuuliyiinta dalka Norway ay kuu dirayaan dal kale oo Yurub ku yaalla, waxaad xaq u leedahay in aad cabasho ka qaadato go'aankooda, qareenkaaga ayaana ku caawin doona.
- Haddii aad magangalyo ka codsatay dal kale oo Yurub ku yaalla, waxaad taas ku soo hadal qaadi kartaa wadahadalka aad la yeelanayso ururka NOAS si aad warbixin dheeraad ah u hesho.

5. YAA KA BAARAANDEGAYA CODSIGAAGA MAGANGALYADA EE NORWAY?

Agaasinka ajnebiga (UDI) waxay qayb ka tahay dawladda dalka Norway. Way ku waraysanaysaa waxayna go'aan ka gaaraysaa in lagu siinayo oggolaasho joogitaan iyo in kale. UDI si qoto dheer ayay u qiimaysaa codsi magangelyo doon oo kaste, waxayna codsi kaste uga baaraandegtaa si gaar ah.

6. MAXAA DHACAYA MARKA AAD BADBAADIN CODSATO?

Waxaad booliiska iskaga diiwaangelinaysaa in aad magangalyo doon tahay

- Booliisku waxay kaa qaadayaan sawir iyo faro. Waxay su'aalo kaa weydiinayaan arrimaha ay ka mid yihiin cidda aad tahay iyo sida aad ku timid dalka Norway.
- Haddii aad haysato baasabboor ama dukumeentiyo kale oo caddaynaya cidda aad tahay, waxaa muhiim ah in aad kuwaas dhiibto marka lagu diiwaangelinayo.

Waxaad u guuraysaa xero qaxooti

- Diiwaangelinta ka dib waxaa lagu geyn doonaa xero qaxooti oo loogu tala galay magangelyo doonka aan qaangaarka ahayn ee aan lala socon, halkaas oo aad joogi doonto muddada ugu horraysa.
- Ka dib waxaad u guuri doontaa xero qaxooti oo kale.
- Haddii aad 16 jir ka yar tahay, waxaad xaq u leedahay oo waajibna kugu ah in aad dugsi dhigato haddii la filayo in aad dalka Norway joogi doonto muddo ka badan 3 bilood. Haddii aad u dhexeyso 16 jir iyo 19 jir, waxaa dhici karta inaad dugsi dhigato, laakiin dhigashadaasi waajib kuguma aha.
- DWaxaa muhiim ah in aad la hadasho shaqaalaha xerada qaxootiga jooga haddii ay jiraan wax dhibaato kugu haya. Way ku dhegeysan doonaan wayna ku caawin doonaan. Xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga jooga ayaa mas'uul ka ah daryeelkaaga maalin walba.

Waxaa lagaa baari doonaa cudurka qaaxada

- Maalmaha ugu horreeya ee aad joogto xerada qaxootiga, ayaa waxaa lagaa baari doonaa cudurka qaaxada. Arrintani waa mid dadka oo idil khasab ku ah. Haddii aad qabto cudurka qaaxada, waa lagu daaweyn doonaa.
- Haddii aad qabto cudur khatar ah oo daawayn u baahan, waa in aad taas u sheegto xafiiska caafimaadka.

Waxaad warbixin iyo hagid ka heli doontaa ururka NOAS

- Ururka NOAS (Ururka Norway ee loogu tala galay Dadka Magangalyo doonka ah) waxuu ku daawadsiin doonaa filin warbixineed oo ku saabsan hawsha magangalyada kaasoo ku duuban luqad aad si fiican u fahmayso.
- Ka dib marka aad daawato filinka, shaqaale ka socda ururka NOAS ayaa kula hadli doona. Wadahadalka waxaad kula yeelan doontaa luqad aad si fiican u fahmayso. Waxaad heli doontaa warbixin ku saabsan waxa ay ka kooban tahay hawsha codsashada magangalyadu iyo xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Wadahadalkaasi waxuu kuu diyaarin doonaa waraysigaaga magangalyada. Waxaa muhiim ah in aad wadahadalkaas ka faa'iidaysato si aad qofkaas u weydiiso dhammaan su'aalaha aad ka qabto codsashada badbaadinta.
- Ururka NOAS waa urur aan dawli ahayn oo u dooda xuquuqda insaanka, waxuuna ka shaqeeya dhawridda xuquuqda dadka magangalyo doonka ah ee dalka Norway.
- Shaqaalaha ururka NOAS waxaa saaran waajib xog qarin. Waxay taasi ka dhigan tahay in ururka NOAS uusan hay'adda UDI, Booliiska ama cid kale u sheegi doonin waxa aad isaga u sheegto. Sidaas darteed uma baahnid in aad ka cabsato in aad iyaga faahfaahin buuxda ka siiso sababta aad badbaadin ugu baahan tahay.

Waxaa laguu magacaabi abbaan ku meelgaar ah (hjelpeverge)

- Abbaanka ku meelgaarka ahi waa qof weyn oo hubin doona in xuquuqdaada la dhawro. Abbaanka ku meelgaarka ahi waxuu kuu gaari karaa go'aannada ay caadi ahaan waalidkaagu gaari lahaayeen haddii ay kula joogi lahaayeen.
- Inta aad halkan joogto ee aadan haysan waalid ama dad kaloo ku daryeela, waxaad xaq u leedahay in aad lahaato abbaan ku meelgaar ah ilaa iyo inta aad 18 jir ka noqonayso.
- Abbaaanka ku meelgaarka ahi uma shaqeeyo hay'adda UDI.
- Abbaanka ku meelgaarka ahi waxuu ka soo qayb geli doonaa waraysigaaga magangalyada ee aad la yeelanayso hay'adda UDI.
- Haddii aad u guurto xero qaxooti oo cusub, waxaa laguu magacaabi doonaa abbaab kale oo ku meelgaar ah.

Waxaa laguu qabanayaa qareen

- Qareenku waa qof si fiican u yaqaanna sharciyada dalka Norway oo kaa caawinaya codsigaaga magangalyada.
- Dhammaan dadka si cad ugu muuqda in ay 18 jir ka yar yihiin waxaa la siinayaa gargaar sharciyeed oo bilaash ah ka hor waraysiga magangalyada ee ay hay'adda UDI la yeelanayaan. Dadka kale waxaa qareen loo qaban doonaa ka dib baarista da'da ama waraysiga magangalyada.

Waxaa waraysi kaa qaadi doonta hay'adda UDI

- Waraysigaaga magangalyadu waa fursadda ugu muhiimsan ee aad haysato si aad hay'adda UDI ugu sharraxdo sababta aad badbaadin u codsanayso iyo si aad iyada ugu sheegto waxa aad ka baqayso in uu kugu dhaco haddii aad ku noqoto dalkaaga hooyo. Waa in aad iyada faahfaahin buuxda oo la taaban karo taas ka siiso.
- Goorta waraysigaaga, waa in aad weliba hay'adda u sheegto cidda aad tahay, waa in aad uga warranto qoyskiinna iyo safarka aad ku timid dalka Norway.
- Goorta waraysigaaga, waxaa halkaas joogi doona adiga, waraysi qaadaha ka socda hay'adda UDI, abbaankaaga ku meelgaarka ah iyo turjumaan.
- Turjumaanku waxa keliya ee uu samayn doono waa in uu turjumo waxa adiga iyo waraysi qaaduhu ay isu sheegaysaan loomana oggola in uu dadka kale u sheego waxa uu qofkaasi ka arkay ama ka maqlay waraysigaaga.

Baarista da'da

- Dalka Norway gudihiisa, da'daadu waa muhiim marka aad badbaadin doonayso. Codsadeyaasha 18 jir ka yar waxaa loo arkaa carruur sidaas darteedna waxay iyagu leeyihiin xuquuq ka badan kuwa ay leeyihiin dadka waaweyn.
- Maaddaama carruurta badbaadinta rabta ay ka xuquuq badan yihiin dadka waaweyn, mararka qaar dadka waaweyn qaarkood ayaa sheegta in ay 18 jir ka yar yihiin. Dadka magangalyo doonka ah qaarkoodna ma hubaan da'dooda saxda ah. Sidaas darteed hay'adda UDI waxay ka codsan doontaa ku dhawaad dhammaan dadka sheegta in ay u dhexeeyaan 15 jir iyo 18 jir haddii ay oggol yihiin in baaris lagu sameeyo da'dooda.
- Baarista da'du waxay ka kooban tahay baaritaanno caafimaadeed oo sheegaya qiyaas ahaan da'da aad tahay. Waxaad heli doontaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxa ay baaritaannadaasi ka kooban yihiin.
- Hay'adda UDI waxay sidoo kale qiimayn doontaa haddii ay jiraan waxyaabo kale oo gacan ka geysan kara in la caddeeyo da'daada, sida kaar aqoonsi, waraaqaha dhalashada iwm iyo macluumaad laga helo dalal kale. Waxaa muhiim ah in aad ka qaybqaadato caddaynta da'daada iyo cidda aad tahayba.
- Baarista da'du waa wax aad ikhiyaar u leedahay. Haddii aadan rabin in lagu baaro, waxay u badan tahay in laga soo qaado inaad qof weyn tahay. Waxay taasi saamayn ku yeelan kartaa codsigaaga.
- Haddii adiga oo og aad sheegato da' aan sax ahayn, oo hay'adda UDI ay go'aansato in aadan badbaadin uga baahnayn dalka Norway, waa lagu masaafurin karaa. Masaafurintu waxay keeni kartaa in aanan mustaqbalka laguu oggolaan in aad ku soo laabato dalka Norway iyo waddamo kaloo kala duwan oo Yurub ku yaalla
- Haddii hay'adda UDI ay qabto in aad 18 jir ka weyn tahay, laguuma magacaabi doono abbaan ku meelgaar ah iyo qareen midna. Waxaa qareen laguu qaban doonaa haddii codsigaaga la diido.

JAWAAB AYAAD UDI KA HELAYSAA:
Oggolaasho joogitaan ama diidmo

Qareenkaaga ayaa kuu sheegi doona in laguu oggolaaday in aad dalka Norway joogto iyo in kale.

Haddii lagu siiyo oggolaasho joogitaan, waxaa lagu dejin doonaa degmo

- Warbixin dheeraad ah oo taas ku saabsan waxaad ka heli doontaa xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga.

Haddii lagu siiyo oggolaasho xaddidan, waxaa lagu geyn karaa xero qaxooti oo kale.

- Cabasho ayaad ka qaadan kartaa oggolaashadaan. Qareenkaaga ayaa taas kaa caawin doona.
- Warbixin dheeraad ah oo taas ku saabsan waxaad ka heli doontaa xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga.

Haddii codsigaaga la diido, cabasho ayaad qaadan kartaa

- Sida caadiga ah, waad joogi kartaa dalka Norway inta aad sugeyso jawaabta cabashada.
- Qareenka ayaa kaa caawin doona in aad qorato warqadda cabashada si mas'uuliyiinta dalka Norway ay mar labaad uga fiirsadaan codsigaaga magangalyada.

Haddii cabashada la soo diido, waa in aad ku noqoto dalkaaga hooyo

- Safarka aad ku noqonayso waxaa kaa caawin kara International Organization for Migration (IOM). Ururka IOM waxuu kaa bixin karaa kharashka safarka waxuuna kaa caawin karaa in aad hesho dukumeentiyo aad ku safarto.
- Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan safarka aad ku noqonayso waxaad ka heli doontaa xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga.

HADDII AAD RABTO IN AAD DALKAAGA HOOYO KU NOQOTO, TAA WAA LAGAA CAAWIN KARAA.

- Waxaa weliba lagaa caawin karaa in aad dalkaaga hooyo ku noqoto ka hor inta aadan jawaab ka helin hay'adda UDI, inta aad sugayso in cabashadaada laga baaraandego, ama ka dib marka laguu diido codsigaaga magangalyada.
- Waa in abbaankaaga ku meelgaarka ahi uu kugu raaco go'aankaas.
- Ururka IOM ayaa kaa caawin kara safarka aad ku noqonayso. Ururka IOM waxuu kaa bixin karaa kharashka safarka waxuuna kaa caawin karaa in aad hesho dukumeentiyo aad ku safarto.
- Waxaa dhici karta in lacag lagu siiyo haddii aad iskaa u doorato in aad dalkaaga hooyo ku noqoto iyadoo uu ururka IOM ku caawinayo. Mas'uuliyiinta dalka Norway waxay leeyihiin barnaamijyo dadka dib loogu dejiyo waddamada qaarkood. Haddii uu dalkaaga hooyo ka jiro barnaamij noocaas ahi, waxaa laga yaabaa in taageero lacageed lagu siiyo marka aad dalkaaga hooyo u safarto.
- Xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga jooga ayaad arrinkaas kala hadli kartaa waxaanad iyaga ka heli kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sidii aad dalkaaga hooyo ugu noqon lahayd.

Talooyin muhiim ah oo ku saabsan waraysiga magangalyada

- Si fiican uga sheekee oo faahfaahin badan ka bixi sababta ay khasab kuugu noqotay in aad ka soo baxdo dalkaaga hooyo iyo waxa jira ee aad ka cabsanayso haddii aad dalkaaga hooyo ku noqoto.
- Culayska saar waxa adiga shakhsi ahaan kugu dhacay iyo waxa kugu dhici doona haddii ay khasab noqoto in aad dalkaaga hooyo ku noqoto.
- Su'aalaha ku saabsan da'daada ka bixi jawaabo faahfaahsan oo tafaasiil leh.
- Sida ugu suurogal badan sax wax u tilmaan.
- Haddii aad carruur haysato, faahfaahin ka bixi xaaladdooda iyo waxa iyaga soo maray.
- Waraysi qaadaha weydiiso in uu kuu sharraxo wixii aad fahmi weydo.
- Haddii aad haysato dukumeentiyo micno u samaynaya codsigaaga magangalyada, waa in aad iyaga u soo qaadato waraysigaaga.
- Runta sheeg. Haddii aad wax qalad ah sheegto, waxay taasi keeni kartaa in codsigaaga la diido. Waxaa weliba lagaa masaafurin karaa dalka Norway, taasoo keeni karta in aanan mustaqbalka laguu oggolaan in aad ku soo laabato dalka Norway iyo waddamada kalee Yurub ku yaalla intooda ugu badan.

WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA KUU YAALLA ADIGA OO AH MAGANGALYO DOON

Waxaa waajib kugu ah in aad gacan ka geysato caddaynta cidda aad tahay

Waxaa muhiim u ah masuuliyiinta dalka Norway in ay ogaadaan cidda aad tahay iyo da'da aad tahay. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in aad keento dukumeentiyo xaqiijin kara cidda aad tahay. Haddii ay mas'uuliyiinta dalkaaga hooyo dabagal kugu hayaan, mas'uuliyiinta dalka Norway kaama dalbi doonaan in aad iyaga la xiriirto si aad uga hesho dukumeentiyada aqoonsiga.

Haddii ay mas'uuliyiinta dalka Norway ka shakiyaan cidda aad tahay, waxaad halis ugu jirtaa in:

- aanan lagu rumaysanin
- ay hoos u dhacd fursadda aad oggolaasho ku heli karto
- aad weydo xuquuq aad caadi ahaan yeelan lahayd
- lagu siiyo oggolaasjo joogitaan oo xaddidan

Waxaa waajib kugu ah in aad bixiso macluumaad sax ah

Maadaama aad magangalyo doon tahay, waa in aad sharraxdo sababta aad badbaadin u doonayso. Taas awgeed waa in aad si kaste ugu dadaasho in aad bixiso macluumaadka lagaa rabo oo aad wadashaqayn la timaaddo.

Wax kasta oo aad dadka kale ka maqashayba ka hor intii aadan magangalyo (badbaadin) codsanin, waxaa muhiim ah in aad mas'uuliyiinta dalka Norway u sharraxdo sababaha dhabta ah ee codsigaaga magangalyada. Waa dembi laguu ciqaabi karo in aad bixiso macluumaad aan sax ahayn. Waxay weliba taasi keeni kartaa masaafurintaada.

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay in aad shaqayso inta aad magangalyo doonka tahay
Haddii aad caddayn karto cidda aad tahay, taas oo caadi ahaan lagu caddeeyo baasabboor la keeno, waxaad xaq u yeelan kartaa in aad shaqayso inta laga baaraandegayo codsigaaga. Waa in abbaankaaga ku meelgaarka ahi uu oggolaado go'aankaas waana in shaqadaadu aanay hor joogsan waxbarashadaada.

Waxaad xaq u leedahay in lagu daaweeyo
Waxaad xaq u leedahay daawaynta lagama maarmaanka ah inta aad jawaab ka sugayso codsigaaga magangalyada. Dhammaan dadka ka weyn 16 jir ee Norway ku nool waa in ay caadi ahaan laftigoodu kharashka qayb ka bixiyaan. Haddii aad u baahan tahay gargaarka takhtar cilminafsiyeed, kharashkaas hay'adda UDI ayaa kaa bixin karta. Si aad taas warbixin dheeraad ah uga hesho la xiriir xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga. Waa in aad hay'adda UDI iyo abbaankaaga ku meelgaarka ah u sheegto haddii aad qabto dhibaatooyin caafimaad oo waaweyn.

Waxaa kuu furan in aad la noqoto codsigaaga magangalyada
Waxaad la noqon kartaa codsigaaga magangalyada waqti kastoo aad rabto. Waxaad markaa fursad u helaysaa in aad codsi u dirsato ururka IOM si uu kaaga caawiyo safarka aad ku tagayso dalkaaga hooyo.

Miyaad rabtaa in lagaa caawiyo raadinta waalidkaaga ama xubnaha kale ee qoyskaaga?
Haddii aad rabto in lagu caawiyo si aad ula xiriirto ama u soo hesho waalidkaaga ama xubnaha kale ee qoyskaaga, waxaad la xiriiri kartaa xubnaha shaqaalaha ee xerada qaxootiga.

Hay'adda Laanqayrta Cas ayaa iyana kaa caawin karta in aad soo hesho qoyskiinna.

WAAJIBKA XOG QARINTA

Booliiska, hay'adda UDI iyo UNE (Guddiga ajaanibka) waxaa saaran waajibka xog qarinta. Waxay taasi ka dhigan tahay in iyagu aanay macluumaadka ku saabsan codsigaaga magangalyada u sheegi karin mas'uuliyiinta dalkaaga hooyo. Welibana looma oggola in waxa aad iyaga u sheegto ay u sii sheegaan dad kale oo aanan shaqo ku lahayn codsigaaga magangalyada. Waa dembi loo ciqaabi karo haddii ay jebiyaan waajibka xog qarinta. Sidaas darteed uma baahnid in aad ka cabsato in aad faahfaahin buuxda ka bixiso sababta aad badbaadin ugu baahan tahay.

Turjumaanka, qareenka, shaqaalaha caafimaadka iyo ururka NOAS waxaa sidoo kale iyaga saaran waajib xog qarin. Waxay taasi ka dhigan tahay in dadkaas waxa aad u sheegto aanan loo sheegi doonin dad kale, xataa hay'adda UDI, UNE ama booliiska.

Buuggan warbixineed waxaa soo diyaariyey Ururka Norway ee loogu talagalay Dadka Magangalyo doonka ah (NOAS). Ururka NOAS waa urur xuquuqda insaanka u dooda oo aanan dawladda u shaqaynin isagoo warbixin iyo kaalmo sharciyeed ugu deeqa dadka magangalyo doonka ah.

CIIWAANNO

BOOLIISKA AJNEBIGA (POLITIETS UTLENDINGSENHET)

Booliisku waxay diiwaan geliyaan dadka magangelyo doonka ah ee cusub.
Booliisku waxay kaloo waddanka ka saaraan dadka magangelyo doonka ah ee inta codsigooda la diiday aan dalka iskood uga bixin.

Ciiwanka Boostada: Postboks 8102 Dep, 0032 Oslo, Norway
Ciiwaanka soo booqashada: Christian Krohgs gate 32, 0186 Oslo
Telefoonka: + 47 22 34 24 00, Fakis: + 47 22 34 24 80
E-mail: pu@politiet.no

WAAXDA AGAASINKA AJNEBIGA (UDI)

waa hey'ad dowladeed oo ay shaqooyinkeeda ka mid yihiin ka baaraandegidda codsiyada magangelyo doonka, qoys isu keenidda, fiisayaasha iyo arrimaha qaadashada dhalashada dalka. UDI waxay kaloo mas'uul ka yihiin xeryaha qaxootiga.

Ciiwaanka Boostada: Postboks 8108 Dep., 0032 Oslo, Norway
Ciiwaanka soo booqashada: Hausmannsgt. 21, 0182 Oslo
Telefoonka: + 47 23 35 15 00, Fakis: + 47 23 35 15 01
Website: www.udi.no, E-mail: ots@udi.no

URURKA CAALAMIGA AH EE HAAJIRIINTA (IOM)

Warbixinta caawimaadda dib u noqoshada uu qofku iskiis u dooranayo.

Ciiwaanka Boostada: Postboks 8927 Youngstorget, 0028 Oslo, Norway
Ciiwaanka soo booqashada: Storgata 10a, dabaqa 2aad, 0155 Oslo
Telefoonka: + 47 23 10 53 20, Fakis: + 47 23 10 53 21
E-mail: osloreturn@iom.int

Saacadaha shaqada: Maalmaha shaqada: 10:00 – 15:00,
Maalmaha fasaxa: Xiran yihiin

GUDDIGA ARRIMAHA AJAANIIBTA (UNE)

Waa unug maammul oo sidii maxkamad oo kale ah kaas oo ka baaraandega cabashooyinka laga qaato diidmada ay UDI bixiso.

Ciiwaanka Boostada: Postboks 8165 Dep., 0034 Oslo
Ciiwaanka soo booqashada: Stenersgt. 1B/C, 0050 Oslo
Telefoonka: + 47 21 08 50 00, Fakis: + 47 21 08 50 01
Website: www.une.no, E-mail: postmottak@une.no

LAANQAYRTA CAS EE NORWAY (NORGES RØDE KORS)

adeegga baafinta, waxay dadka ka caawiyaan sidii ay isu heli lahaayeen xubnaha qoyska ee ku kala dhumay dagaallada, khilaafyada iyo dhibaatooyinka dabiiciga ah.
Laanqaynrta casi ma siinayaan warbixintaada UDI ama hey'ado kale midn. Adeeggu waa bilaash.

Ciiwaanka Boostada: Postboks 1 Grønland, 0133 Oslo, Norway
Ciiwaanka soo booqashada: Hausmannsgt. 7, 0186 Oslo
Telefoonka: + 47 22 05 40 00
Website: www.rodekors.no, E-mail: tracing@redcross.no

NOAS waa urur aan dowli ahayn oo u dooda xaquuqda bini aadamka oo siiya warbixin iyo caawinaad xaga sharciga ah dadka magangelyo doonka ah.

Buugaan waxaa ku yaalla warbixin muhiim u ah magangelyo doonayaasha magangelyada ka codsada Norway.

Ururka Norway ee loogu talagalay Dadka Magangalyo doonka ah (NOAS)
Cinwaanka lagu booqdo: Torggata 22, 0183 Oslo, Norway
Cinwaanka boostada: P.O. Box 8893 Youngstorget, NO-0028 Oslo, Norway
Tel.: 22 36 56 60, Fakis: 22 36 56 61
Website: www.noas.org, E-mail: noas@noas.org